

FAAFIN RASMI AH

الرسمية



الجريدة

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 15aad

Muqdisho 1da Seb. 1987

L. 9

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O B N I I N

Q A Y B T A K O W A A D

S H A R C I

SHARCI L. 19 ee 9 Maajo 1987,

Sharciga Maalgelinta Shisheeye Bog. 749

LAW L. 19 on the 9 May 1987,

The Foreign Investment Law 761

Q A Y B T A L A B A A D

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 37 ee 25 Agoosto 1987,

Kordhinta Saamiyada Dawladda JDS

ee Bankiga Adduunka 773

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 38 ee 27 Agoosto 1987,

Magacaabid Nootaayo 775

Q A Y B T A S A D D E X A A D

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 26.8.1987

Lumid Jeeg Wareega L. 0378131 ku qoran

J/le Cabdi Maxamuud Saalax 776

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.8.1987,

Lumid Jeeg War. L. 0842248 ku qoran

Mahad Jibriil Ciise 777

Q A Y B T A K O W A A D S H A R C I

Sharci lambar 19, taariikh 9 Maajo 1987
Sharciga Maalgelinta Shisheeye.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA

Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee
Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad
(*Maalgelinta Shisheeye*)

Marka Sharcigan laga hadlayo, "Maalgeliye Shisheeye" waxaa loola jeedaa: qof kasta ama hay'ad kasta oo shisheeye oo leh aqoonsi sharciyeed.

Qod. 2aad
(*Maalgelin Shisheeye*)

Maalgelin shisheeye waxaa ah:

1. Lacag adag oo lagu warejiyo dalka kana mid ah lacagaha sarrifma ee qalaad ee uu cayimay Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed;
2. Makiinado, qalab, dayactir, dhismooyin iyo alaab kasta ee kale oo sida Sharciga Keenidda waafaqsan lagu keenay;
3. Mulkiyadda summadaha ganacsiga iyo rukhsooyinka lagu soo wareejiyo dalka ee loogu baahdo hawlaha lagu fulinayo maalgelinta la soo jeediyey;
4. Kharajka daraasado iyo qoraallo farsamo ee loo diyaariyey ama la xiriira maalgelinta la oggolaaday;
5. Macaashka ka dhasha maalgelinta shisheeye ee loo oggolaaday, waafaqsanna sharcigan ee dib loo geliyey. Maalgelinta kor ku xusan waa mid lagu sameeyey mashruuc ama lagu ballaarinayo mashruuc si sharciga waafaqsan uga diiwaan-gashan dalka.

Qod. 3aad
(Guddiga Maalgelinta Shisheeye)

1. Guddiga Maalgelinta Shisheeye oo hadda wixii ka dambeeya la oran doono "Guddiga" wuxuu leeyahay awoodda ugu sarreysa ee go'aan ka gaaridda dhammaan arrimaha la xiriira maalgelinta shisheeye ee lagu samaynayo dalka. Guddiga fadhigiisu wuxuu noqonayaa xarunta Wasaaradda Qorsheynta Qaranka oo uu ku kulmi doono ugu yaraan laba jeer bashiiba.
2. Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa:
 1. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka;
 2. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
 3. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Maaliyadda;
 4. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Warshadaha;
 5. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Ganacsiga;
 6. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Lacagta;
 7. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;
 8. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda ay hoos imaaneyso mas'uuliyadda maalgelinta shisheeye ee markaas laga hadlayo, marka laga reebo Wasaaradaha kor ku xusan;
 9. Agaasiamaha Guud ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed;
 10. Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga, Warshadaha iyo Beeraha, waxaana Shir-guddoomiye u noqonaya Guddiga Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka.

Qod. 4aad
(Hawlaha Guddiga)

Hawlaha guddigu waxay noqonayaan sida soo socota:

1. Oggolaashaha maalgelinta shisheeye ee la soo jeediyey asagoo raacaya tilmaamaha siyaasadeed ee ku xusan qod. 7aad ee sharcigan.
2. Oggolaashaha diiwaangelinta maalgelinta shisheeye.
3. Dib-u-eegidda diiwaangelinta maalgelinta shisheeye ee horey loogu sameeyey sharciyadii maalgelinta dibadeed ee jirey, si maalgelintaas uga faa'iideysato axkaanta u daneyneysa ee sharcigan sida ku cad qodobkisa 21aad.

4. Goynta qiimaha maalgelinta shisheeye ee waafaqsan qod. 2aad, xubnaha 2, 3, iyo 4 ee sharcigan.
5. Xaqiijinta waafaqsanaanta axkaanta qod. 16aad ee ku saabsan amaah ka qaadashada ilaha gudaha.
6. U fududeynta siinta rukhsooyinka dal-ku-joogga shaqaalaha shisheeye ee ay qoranayaan shirkadaha shisheeye ee ku diiwaangashan sharcigan.
7. Gudashada hawl kasta oo kale oo la xiriirta maalgelinta shisheeye ee waafaqsan sharcigan.

Qod. 5aad

(Fadhiyada iyo go'aannada Guddiga)

Fadhiga Guddigu wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qayb galaan ugu yaraan 7 xubnood oo uu ku jiro Guddoomiyuhu. Go'aannada Guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.

Qod. 6aad

(Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgelinta Shisheeye)

Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgelinta Shisheeye oo hadda iyo wixii ka dambeeya la orn doono "Xafiiska" wuxuu yahay xafiiska maamulka iyo horumarinta ee guddiga gacan ku siinaya gudashada hawlihiisa. Hawlaha xafiiskuna waxay yihiin:

1. meelmarinta go'aannada guddigu gaaro;
2. soo jeedinta nidaamka iyo hab maamuleedka looga baahan yahay dhaqan gelinta sharcigan;
3. siinta maalgelinta shisheeye macluumaadka iyo talooyinka la xiriira arrimaha ay ka midka yihiin codsiga iyo diiwaangelinta ee uu sharcigan dhigayo, nidaamka ganacsiga dibedda, fursadaha maalgelineed, qaab dhismeedka hay'adaha, ilaha gudaha ee laga heli karo amaah lacageed, wadaag maalgelineed;

4. ka kaalmeynta maalgeliyaha shisheeye buuxinta shuruudaha la xiriira qaddimadda codsiga maalgelineed;
5. gacan ku siinta maalgelinta shisheeye ee la oggolaaday ee ku jira heer abaabul iyo dhismo asagoo u fidinaya talo iyo tusaale ku saabsan hay'adaha Dastuuriga ee ku shaqada leh, wad-dooyinka loo marayo iyo habraaca maamuleed ee la xiriira;
6. soo jeedinta talooyinka la xiriira siyaasadda iyo hagaajinta jawiga maalgelinta shisheeye;
7. horumarinta iyo soo dhaweynta maalgelin shisheeye oo hor leh asagoo la kaashanaya hay'adaha kale ee ku shaqada leh maalgelinta;
8. gudashada hawl kasta oo la xiriirta maalgelinta shisheeye oo uu guddigu u xilsaaro.

Qod. 7aad

(Mudnaanta maalgelinta iyo qaybaha)

- b) lagaga faa'iideysanayo cududda dadka iyo kheyraadka dalka;
- t) keeneysa farsamo cusub oo ku habboon duruufaha dalka;
- j) abuurid dakhli cusub ama baajineysa lacag adag oo ku tim id dhoofin badeeco cusub ama beddesha kuwo dibedda laga keeno ama adeeg hawleed;
- x) ka qayb qaadaneyso isu-dheellitirka horumarinta dhaqan-dhaqaale ee gobollada, gaar ahaanna dhinacyada:
 - i) beeraha;
 - ii) xoolaha;
 - iii) kalluunka;
 - iv) macdanta;
 - v) warshadaha;
 - vi) horumarinta dalxiiska;
 - vii) wax soo saar ama adeeg taageeraya ama dhiirrigelinaya horumarinta qaybaha kor ku xusan.

Qod. 8aad

(Habka qaddimaadda codsiga diiwaangelinta maalgelinta shisheeye)

1. Maalgeliyaha shisheeye wuxuu codsiga ku soo qaddimayaa foomka loo yaqaan "**Codsiga Diiwaangelinta Maalgelinta Shisheeye**" oo laga helo Xafiiska Maalgelinta Shisheeye ee ku yaal Wasaaradda Qorsheynta Qaranka asagoo lagu soo ridayo warqad sajiilan oo ku socota "Guddiga Maalgelinta Shisheeye" ee laga helo Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, Muqdisho, Soomaaliya.
2. Maalgeliyaha shisheeye wuxuu arjiga si toos ah u keeni karaa xafiiska oo siin doona caddeyn ka qabasho.
3. Xafiisku wuxuu hubinayaa dhammeystirnaanta arjiga, haddii uu weydiisto codsaduho. Wuxuuna siinayaa caddeyn muujineysa in uu buuxiyey shuruudaha maalgelinta.

Qod. 9aad

(Shuruudaha iyo habka oggolaanshaha)

1. Muddo lixdan casho gudaheed, laga bilaabo maalintala qabtay arjiga maalgelinta ee dhammeystiran, guddigu wuxuu go'aanka ku ogeysiinayaa codsadaha warqad sajiilan. Haddii uu codsaduho doorto, waxaa xafiiska toos uga qaadi kara qof wakiil ka ah oo caddeyn laga reebo inuu qaaday go'aanka.
2. Haddii ay dhacdo in wax laga beddelo arjiga codsiga, guddigu wuxuu isbeddelkaas ku ogeysiinayaa codsadaha warqad sajiilan ama waxaa toos xafiiska uga qaadi kara qof ka wakiil ah.
3. Guddigu asagoo u marinaya xafiiska ayuu ku wargelinayaa maalgeliyaha oggolaashaha maalgelinta shisheeye, sagoo isla mar ahaantaana siinaya shahaaho loo yaqaan "**Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Mashruuca la oggolaaday**". Oggolaanshahaas wuxuu maalgeliyuhu u suuragelinayaa diiwaangelinta maalgelinta.
4. "Shahaaddada maalgelinta Mashruuca la oggolaaday" waxay ku eg tahay muddo 18 bilood ah laga bilaabo maalinta la soo saaray. Muddadas gudaheeda, codsaduho waa in uu dalka ku soo wareejiyaa hantida ku tilmaan qod. 2aad, xubnaha 1, 2, 3 iyo 4. Haddii muddadaas la dhafo, guddigu wuxuu siin karaa, haddii uu weydiisto codsaduho, muddo dheeraad ah, ama uu weydiinayaa arji cusub.

5. Maalgelinta shisheeye ee ku xusan qod. 2aad, xubnihiisa 1, 2, 3 iyo 4 ee lagu kordhiyo mashruuc horey loogu sameeyey maalgelin diiwaan-gashan waxa uu u baahn ayahay qaddimaad codsi iyo oggolaansho, sida ku cad qod. 8aad, xubnihiisa 1, 2, 3 iyo 4 ee qodobkan.

Qod. 10aad

(Shuruudaha iyo habka diiwaangelinta)

1. Guddigu wuxuu diiwaangelinayaa maalgelinta isla marka uu maalgeliyuhu Soomaaliya soo geliyo hantida ku xusan qod. 2aad, xubnaha 1, 2, 3 iyo 4 ee waafaqsan qodobbada iyo shuruudaha ku qoran "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye" ee mashruuca la oggolaaday. Si taasi u saaragasho, guddigu wuxuu maalgeliyaha shisheeye siinayaa shahaaddo loo yaqaan "**Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan**".
2. Haddii dalka lagu soo wareejiyo hantida ku xusan qod. 2aad, xubnihiisa 2, 3 iyo 4, guddigu wuxuu ku tallaabsanayaa diiwaangelinta isla marka uu xaqiijiyo qiimaha uu maalgeliyaha shisheeye ku sheegay hantida uu dalka ku soo wareejiyey ay tahay qiimaha dhabta ah ee suuqa. Guddigu wuxuu maalgeliyaha shisheeye weydiisan karaa inuu keeno caddeymo qoraal ah oo muujinaya qiimaha hantida uu dalka ku soo wareejiyey. Haddii hantida lagu soo wareejiyo sida ku xusan xubinta 2aad ee qod. 2aad, qiimahaas waxaa loo goynayaa si waafaqsan shuruudca keenista badeecadaha dibedda.
3. Maalgelinta shisheeye waxa lagu diiwaangelinayaa lacah ka mid ah lacagaha qalaad ee sarrifmi kara ee uu caymiyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

Qod. 11aad

(Dib-u-gelinta macaashka)

1. Macaash waxaa loola jeedaa dakhliga saafiga ah ee laga jaray cashuurta ku waajibtay ee waafaqsan shuruudca canshuuraha dalka.
2. Macaashka ka dhashay maalgelin si sharci ah u diiwaangashan waxaa dib loo gelin karaa isla mashruucaas ama mashruuc kale ayadoo loo raacayo qodobbada iyo shuruudaha sharcigan dhigayo.

3. Marka macaashka noocaas ah dib loogu gelinayo mashruuca, waa in lagu wargeliyaa guddiga warqad sajiilan ama si toos ah loogu geeyaa asagoo laga qaadanayo caddeyn hubal helid.
4. Guddigu wuxuu ku diiwaangelinayaa macaashka dib loo geliyey lacagta sarrifmeysa ee ku cayiman “Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan”. Cadadka lacagta waxaa lagu goynayaa si waafaqsan shuruudaha iyo nidaamka u degsan sarrifka lacagaha qalaad.
5. Si taasi u suurtoowdo, guddigu wuxuu bixinayaa **“Shahaaddada Dib-u-maalgelinta Macaashka Diiwaangashan”**.
6. Wixii wareejimo dambe iyo dibad u saarid raasumal ama macaashka kale ah ee uu oggol yahay sharcigani waxaa lagu saleynayaa maalgelinta asalka ahayd ee diiwaangashaneyd oo lagu daray macaashka dib loo geliyey mashruuca.
7. Haddii ay dhacdo in macaashka dib loo geliyo mashruuc ka duwan mashruuc lagu sameeyey maalgelin shisheeye oo si sharci ah u diiwaangashan, waxaa lagu dhaqayaa arkaanta qodobbada 8 iyo 9 ee sharcigan.

Qod. 12aad
(Wareejinta Macaashka)

1. Macaashka ka dhasha maalgelin si sharciga ah u diiwaangashan, sida ku cad xubinta 1aad ee qod. 11aad, si xor ah ayaa dibedda loogu wareejin karaa.
2. Haddii macaashkaasi in ka mid ah loo wareejiyo dibedda, maalgeliyaha shisheeye wuxuu haraaga macaashkas wareejiisan karaa sanooyinka xiga.

Qod. 13aad
(Dib-u-la-noqoshada Maalgelinta Shisheeye)

1. Maalgelinta shisheeye ee sida sharciga ah u diiwaangashan ee isugu jirta maalgelintii asalka ahayd iyo macaashkii dib loo geliyey, waxaa dibedda looga saari karaa shan sano kaddib marka laga bilaabo maalinta la diiwaangashay maalgelinta asalka ah ee ku cayiman “Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan”.

2. Guddigu wuxuu soo gaabin karaa ama dheereyn karaa mudada ku xusan xubinta 1aad ee qodobkan, asagoo tixgelinaya mudnaanshaha ku cad tilmaamaha siyaasadeed ee uu qorayo qod. 7aad, xubinta 1aad ee sharcigan.
3. Waxaa maalgelinta dib loogu qaadanaya lacagtii qalaad ee asalka ahayd ee ku cayiman “Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan”; lacagta loo wareejinayo dibedda waa in ay tahay mid ka dhalatay iibinta hay’ad aqoonsi sharci leh ama dad. Maalgeliyaha shisheeye wuxuu awood u leeyahay in uu dibedda u wareejsito hantida maguurtada ah ee maalgelinta mashruuca, haddii uu doorto.
4. Haddii lacagta ka soo baxday iibka hantida maguurtada ah ay ka badato maalgelintii asalka ahayd ee lagu daray macaashka dib loo geliyey ee diiwaangashan, maalgeliyaha shisheeye wuxuu xor u yahay dibad u wareejinta farqiga, asagoo raacaya shuruucda canshuuraha ee jira iyo qawaaniinta sarrifka lacagaha qalaad.

Qod. 14aad

(Wareejinta mulkiyadda maalgelinta Shisheeye iyo shuruucda ogeysiinta

1. Wareejinta mulkiyadda maalgelinta shisheeye waxay ku imaanaysaa iibin ta hantida maguurtada ah ama u wareejinta saamiyaasha mashruuca la maalgeliyey qof ama hay’ad aqoonsi sharciyeed leh.
2. Haddii maalgelin lagu wareejiyo deggane aqoonsi sharci leh, ama qof Soomaaliyeed, wareejiyaha waxa ka joogsanaya wixii xuquuq ahaa ee uu ku heli jirey maalgeliye shisheeye.
3. Wareejiyaha iyo lagu-wareejiyaha waxaa qasab ku ah inta aaney la kala wareegin maaliyadda in ay soo wargeliyaan guddiga ayagoo soo raacinaya qoraallada iyo dukumenti taageraya kala wareejinta.
4. Ku wareejinta maalgelinta shisheeye maalgeliye shisheeye oo kale uma baahna oggolaansho cusub sida ku xusan qod. 9aad ee sharcigan, balse waxa ay tahay in guddiga la wargeliyo sida xubinta 4aad ee qodobkan dhigeysa.

Qod. 15aad
(Dhiirrigelinta Maalgelinta)

1. Maalgelinta shisheeye waxaa la siinayaa dhiirrigelin iyo tas-hiilaad waafaqsan shuruucda jirta ee la xiriira tas-hiilaadka.

Qod. 16aad
(Xadka amaah ka qaadashada ilaha gudaha)

1. Mashruuc kasta oo la geliyey maalgelin shisheeye si sharci ahna loo diiwaangeliyey wuxuu amaah ka qaadan karaa hay'adaha lacagta ee gudaha ilaa xadka uu gooyey Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed, asagoo guddiga kala tashaday.
2. Lacagaha laga helo amaahdii laga qaatay hay'adaha lacagta ee gudaha waxaa loo isticmaali karaa oo keli ah fulinta hawsha ku cayiman "Shahaaddada Maalgelinta Shisheeye ee Diiwaangashan". Guddigu wuxuu awood u leeyahay inuu hubiyo in sidaas loogu dhaqmay.

Qod. 17aad
(Tas-hiiladka Shaqaalaha Shisheeye)

1. Guddigu wuxuu hubinayaa in Hay'adaha Socdaalku u fudu-deeyaan helitaanka rukhsadaha Dal-ku-joogga iyo deggan-aanshe shaqaale shisheeye ee uu qorto mashruuc ku diiwaangashan sharcigan iyo xaasaskooda.
2. Guddigu waxa kale ee uu hubinayaa in shaqaalahaas iyo xaasaskooda loo oggolaado marka ay uga baahdaan sabab shaqo in ay tagaan goob kasta oo Soomaaliya ka mid ah ee uusan sharcigu mamnuucayn.
3. Shaqaalahaas waxay awood u leeyihiin in ay dibedda u xawis-haan 50% mushaarkooda iyo gunnooyinkooda.
4. Mashruuc kasta oo lagu diiwaangeliyey sharcigan, wuxuu qoranayaa Shaqaalaha Soomaaliyeed ee leh aqoonta iyo xirfadaha looga baahan yahay shaqada. Maalgelinta shisheeye waxay tahay mid ka qayb qaadanaysa u soo wareejinta dalka aqoonta farsamo iyo maamul ee kor loogu qaadayo aqoonta xirfadeed ee ka jirta dalka.

Qod. 18aad
(*Damaanadda Maalgelinta Shisheeye*)

1. Mashruuc lagu sameeyey maalgelin shisheeye waxaa la siin doonaa tas-hiilaad la mid ah kuwa la siiyo mashaariicda waddaniga.
2. Mulkiyadda maalgelinta shisheeye ee sida qaanuunka loogu diiwaangeliyey Sharcigan lalama wareegi karo haddii aysan khasbin dan guud oo aan si kale loo xallin karin.
3. Haddii ay dhacdo in lala wareego hantida maalgelinta shisheeye, waxaa dhakhso loo bixinayaa magdhow u dhigma. Magdhowgaas wuxuu noqonayaa mid la mid ah hantida maguurtada ee lala wareegay ama u dhiganta qiimaheeda suuqa. Magdhowgaas la bixiyey si xor ah ayaa loo wareejiisan karaa.

Qod. 19aad
(*Xallin khilaafaadka*)

1. Khilaafaadka maalgelineed ee ka dhasha meelmarinta Sharcigan waxaa lagu xallinayaa:
 - b) hab saaxiibtinnimo oo lagula heshiiyey Maalgeliyeyaasha;
 - t) ama, haddii la waayo heeshiiska ku xusan xarafka (b), habka ay qorayaan Heshiisyada ka dhexeeya Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliyeed iyo Dalka uu Maalgeliyuhu u dhashay;
 - j) ama, haddii la waayo Heshiisyada ku xusan xarfaha (b) iyo (t), habka uu qorayo Axdiga Xallinta Khilaafaadka Maalgelineed ee ka dhexeeya Dawladda iyo Muwaaddiiniin Dalal kale, kaasoo ay Soomaaliya dhinac ka tahay, sida uu qorayo Sharciga lambar 11 ee 1967.
2. Haddii la waayo Heshiisyada iyo Axdiga ku xusan xubinta koowaad ee Qodobkan, khilaafaadkaas waxaa lagu xallin karaa in la adeegsado dhexdhexaadinta. Markaas waxaa la dhisayaa Guddi dhexdhexaadin ah oo ka kooban laba xubnood oo ka kala wakiil ah dhinacyada iyo xubin saddexaad oo Guddoomiye u noqota oo ay wadajir u magacaabaan labada xubnood oo la soo sheegay. Haddii lagu heshiin waayo magacaabidda Xubinta saddexaad soddon casho gudahood, laga billaabo maalinta la magacaabay xubinta labaad, Shir-guddoomiye waxaa dooranayo Guddoomiyaha Maxkamadda

Sare ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ka dib markuu weydiisto dhinacyada midkood. Guddiga dhexdhexaadintu wuxuu degsnayaa nidaamka uu ku shaqaynayo iya-doo aysan ciriirineyn nidaamka ay qorayaan Xeerarka Habka Maddaniga iyo Ganacsiga marka laga reebo qodobbada la xiriira damaanadda sasaasiga ah iyo mabaadii'da Qaranka. Guddigu wuxuu xaqiijinayaa in qilaafaadka deg deg loo dhammeeyo. Go'aannada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah, wuxuuna noqonayaa mid kama dambeys ah loona fulin karo sida xukun kasta oo kale ee kama dambeys ah. Guddiga dhexdhexaadinta ayaa go'aan ka gaaraya cidda qaadeysa kharashka dhexdhexaadinta.

Qod. 20aad

(Faa'iidooyinka Maalgelinta Shisheeye ee jirta)

1. Maalgelinta shisheeye ee hadda ka jirta Dalka ee lagu diiwaangeliyey Shuruucda ku saabsan Maalgelinta Shisheeye waxaa u soconayaa xuquuqda iyo waajibaadka lagu siiyey Shuruucda la xusay.
2. Maalgelinta shisheeye kor ku xusan waxay ka faa'iideysaney-saa, haddii uu Maalgeliyaha shisheeye door biddo, axkaanta Sharciga cusub, haddii shuruudihii diiwaangelinta iyo axkaanta Sharciyadii hore la dhowray, Maalgeliyuhuna keeno caddeymo qoraal ah oo sidaas muujinaya laguna kalsoonaan karo. Haddii ay sidaas u dhacdo, Maalgeliyaha shisheeye wuxuu Guddiga weydiisan karaa diiwaangelin hoos imaaneyna Sharciga cusub 180 maalmood gudahooda laga billaabo taariikhda Sharciga cusub la soo saaray.

Qod. 21aad

(Maalgelinta shisheeye ee aan Sharciga khuseyn)

Axkaanta Sharcigan laaguma dhaqayo Maalgelinta shisheeye ee la xiriirta baarista macdanta iyo hawlaha soo saaridda macdanta oo ay ku jiraan kuwa la xiriira warshadaha batrooika iyo qowadda nukliyeerka. Maalgelintaas waxaa lagu dhaqayaa Sharciga baarista iyo soo saaridda macdanta iyo Xeer-nidaamiyaha Macdanta iyo Heshiisyada ay isla galeen Dawladda Soomaaliyeed iyo cidda ka dan leh.

Qod 22aad

(Wajibbaadka ka warbixineed dhaqdhaqaaqa Maalgelinta shisheeye)

Bankiyada, Notaayaasha Guud, Hay'adaha Dawladda ee shaqada ku leh Maalgelinta shisheeye waa in ay Guddiga ku wargeeliyaan wixii dhaqdhaqaaq macaamileed ee ay la yeeshaan, 30 maalmood gudahooda, laga billaabo maalinta dhaqdhaqaaqaas macaamileed la sameeyey. Arrintan waxa ay la xiriirtaa arrimaha ay ka mid yihiin dhismaha shirkadaha iyo mashaariicda, amaah ka qaadashada Hay'adaha Lacagta ee Gudaha ama Dibedda, xawilaadda macaashka iyo dibad u wareejinta maalgelinta.

Qod. 23aad

(U hoggaansanaan la'aanta axkaanta Sharcigan)

U hoggaansanaan la'aanta Axkaanta Sharciga waxa ay Maalgeliyaha shisheeye badeysaa waayatiin xuquuqda uu ku heli lahaa Sharcigan.

Qod. 24aad

(Ka faa'iideysiga shuruuc cusub ee daneyneysa)

Qodobbada Sharcigan marnaba kama reebeysa in Maalgeliyaha Shisheeye ka faa'iideysto qodobbada u daneynaya ee shuruucda la soo saari doono.

Qod. 25aad

(Xeernidaamiye)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya marka uu arko talada Guddiga Maalgelinta Shisheeye, dhegeystana Wasiirka Qorsheynta Qaranka, arkana go'aanka Golaha Wasirrada, wuxuu soo saarayaa Xeer-hoosaad si habsami ah loogu meelma-riyo Sharcigan.

Qod. 26aad

(Tirtirid)

Waxaa la tirtiray sharci kasta oo aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 27aad

(Dhaqangelin)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 cisho ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Maajo 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Law N. 19 of 9 May 1987

The Foreign Investment Law

THE PRESIDENT

Having Seen: The approval of the Standing Committee of the People's Assembly hereby Promulgates the following Law.

ARTICLE 1

Foreign Investor

Under this law a foreign investor is any foreign juridical or physical person.

ARTICLE 2

Forms of Foreign Investment

Foreign investment can be made in any of the following forms:

1. Convertible currency specified by the Central Bank of Somalia and duly transferred to Somalia;
2. Machinery, equipment, spare parts, installations and current production inputs, whose importation is permitted under the prevailing import legislation;
3. Patent rights, trade marks and licenses duly registered in Somalia, provided they are necessary for the activities to be pursued under the approved investment;
4. The amount of foreign currency spent on studies and technical documentation, prepared in connection with the approved investment;
5. Profit reinvested, originating from foreign investment approved in accordance with this law.

Said investment shall be made for the purpose of the establishment or the expansion of an enterprise incorporated and registered in Somalia.

ARTICLE 3

The Foreign Investment Board

1. The Foreign Investment Board, hereafter referred to as "The Board", shall have the supreme decision making authority over all matters concerning foreign investment in Somalia. It shall be established at the Ministry of National Planning where it shall convene at least twice a month.

2. The Board shall consist of:
 1. The Permanent Secretary of the Ministry of National Planning.
 2. The Permanent Secretary of the Ministry of Foreign Affairs.
 3. The Permanent Secretary of the Ministry of Finance.
 4. The Permanent Secretary of the Ministry of Industry.
 5. The Permanent Secretary of the Ministry of Commerce.
 6. The Permanent Secretary of the Ministry of Revenue.
 7. The Permanent Secretary of the Ministry of Labour and Sports.
 8. The Permanent Secretary of the Ministry under whose sectoral responsibility the respective foreign investment comes, with the exception of the Ministries mentioned above.
 9. The Director General of the Central Bank.
 10. The Chairman of the Chamber of Commerce, Industry and Agriculture.

The Chairman of the Board shall be the Permanent Secretary of the Ministry of National Planning.

ARTICLE 4

Functions of The Board

The functions of The Board shall be the following:

1. To approve proposed foreign investment in accordance with the policy guidelines laid down in Article 7 of this law;
2. To approve the registration of foreign investment;
3. To review the registration of foreign investment made under previous foreign investment legislation in order that such investment may benefit from the more favourable provisions, as per Article 20 of this law;
4. To determine the value of foreign investment made as per Article 2, paragraphs 2, 3 and 4 of this law;
5. To ensure compliance with the provisions of Article 16 concerning the contracting of debt from domestic sources;
6. To facilitate the granting of visas to foreign personnel to be employed by enterprises registered under this law;
7. To perform any other function concerning foreign investment in conformity with this law.

ARTICLE 5

The Board: Quorum and Vote

Seven members of The Board, including the Chairman, shall constitute a quorum. Decisions shall be made by simple majority vote.

ARTICLE 6

The Foreign Investment Promotion Office

The Foreign Investment Promotion Office, hereafter referred to as "The Office", shall be the administrative and promotional office responsible for assisting The Board in the performance of its functions. The duties of The Office shall be the following:

1. To implement the decisions taken by The Board;
2. To propose the administrative and regulatory procedures required for the implementation of this law;
3. To provide information and advice to the foreign investor on matters such as: application and registration procedures under this law; taxation; foreign exchange regime; economic legislation; foreign trade regime; investment opportunities; institutional framework; local sources of debt financing; partner search;
4. To assist the foreign investor in meeting the application requirements related to foreign investment;
5. To assist approved foreign investment, at the incorporation and development stages, with guidance and advice concerning official institutions and channels and related administrative procedures;
6. To formulate proposals concerning foreign investment policy and the improvement of investment conditions;
7. To promote and attract new foreign investment in collaboration with other institutions involved in this field;
8. To perform any other duty related to foreign investment, assigned to it by The Board.

ARTICLE 7

Investment Priorities and Sectors

Priority shall be given to foreign investment in those areas where it:

- a) puts Somalia's human and natural resources to productive use;
- b) introduces innovative technology suited to the country's conditions;
- c) generates new earnings or savings of foreign exchange through exports, resource-based import substitution or service activities;
- d) contributes to regionally balanced socio-economic development;

This refers particularly to foreign investment in or closely related to:

- I) agriculture;
- II) livestock;
- III) fishing;
- IV) mineral resources;
- V) industrial activities using significant amounts of inputs produced by the afore-mentioned sectors;
- VI) tourism, provided the investment harmonizes with the prevailing social, economic and infrastructural conditions;
- VII) any other investment in production and service activities appropriate to support and stimulate, to a significant degree, the development of the afore-mentioned sectors.

ARTICLE 8

Procedures for Application

1. The application by the foreign investor shall be made by completing the form "Application Form for Approval and Registration", available at The Office located in the Ministry of National Planning, and mailing it by registered letter to "The Foreign Investment Board c/o Ministry of National Planning, Mogadishu, Somalia".

2. Alternatively, the foreign investor may deliver the application directly to The Office which will issue a delivery receipt.
3. The Office shall review the application, at the applicant's request, for completeness and certify its satisfaction in respect of this requirement.

ARTICLE 9

Conditions and Procedures of Approval

1. Within sixty (60) days from the date of the receipt of a duly completed investment application, The Board shall notify the applicant by registered mail of its decision. At the applicant's option this notification may be collected by his representative directly from The Office against issue of a delivery receipt.
2. In case a modification of an application is required, The Board shall notify the applicant to this effect by registered letter. At the applicant's option, this notification may be collected by his representative directly from The Office, against issue of a delivery receipt.
3. The Board shall notify, through The Office, the approval of a foreign investment by issuing a "Certificate of Foreign Investment in an Approved Enterprise". Such approval shall be construed by the foreign investor as conferring eligibility for registration under this law.
4. The "Certificate of Foreign Investment in an Approved Enterprise" shall be valid for the period of eighteen (18) months of the date of issue. During said period, the applicant shall effect the transfer of assets to Somalia listed in Article 2, paragraphs 1,2,3, and 4. In case this period is exceeded, The Board may grant, at the applicant's request, an additional period or ask for a new application.
5. Additional investment to be made as per Article 2, paragraphs 1,2,3 and 4 in an enterprise that is the object of a foreign investment already duly registered, shall require application and approval as per Article 8 and paragraphs 1,2,3, and 4 of this Article.

ARTICLE 10

Procedures for Registration

1. The Board shall proceed with the registration of an approved investment as soon as the foreign investor has effected the transfer of assets to Somalia listed in Article 2 paragraphs 1,2,3, and 4, in accordance with the terms and conditions contained in the "Certificate of Foreign Investment in an Approved Enterprise". To this effect The Board shall issue to the foreign investor a "Certificate of Foreign Investment Registered".
2. In the case of a transfer of assets listed under paragraphs 2, 3 and 4 of Article 2, The Board shall proceed with said registration as soon as it is satisfied that the value assigned by the foreign investor to the assets transferred, represents fair market value. The Board may ask the foreign investor to produce sufficient documentary evidence to demonstrate the fair market value of the assets transferred. In case of a transfer of assets as per paragraph 2 of Article 2 this value shall be determined in accordance with the prevailing import legislation.
3. The foreign investment shall be registered in convertible currency, as specified by the Central Bank of Somalia.

ARTICLE 11

Reinvestment of Profit

1. "Profit" shall be understood as "net income" less income taxes payable, as applicable, in accordance with the prevailing legislation.
2. Profit originating from a duly registered foreign investment may be reinvested in the same enterprise that is the object of the investment, or in another enterprise in accordance with the provisions of this law.
3. When such profit is to be reinvested, The Board shall be notified to this effect by registered mail or directly, against issue of a delivery receipt.

4. The Board shall proceed to register profit reinvested in the convertible currency specified in the "Certificate of Foreign Investment Registered". The amount shall be determined in accordance with the prevailing laws and regulations governing foreign exchange.
5. To this effect, The Board shall issue a "Certificate of Reinvestment".
6. Subsequent rights to transfer profit and repatriate investment, as well as other benefits under this law, shall be determined on the basis of the original registered investment plus profit reinvested.
7. In the case of the reinvestment of profit in an enterprise, other than the enterprise that is the object of a duly registered foreign investment, the provisions of Article 8 and 9 of this law shall apply.

ARTICLE 12

Transfer of Profit

1. Profit originating from a duly registered foreign investment, as per paragraph 1 of Article 11, may be freely transferred abroad.
2. In the case that only part of such profit is transferred abroad in one year, the foreign investor may transfer the remaining portion in any one of the following years.

ARTICLE 13

Repatriation of Foreign Investment

1. Duly registered foreign investment, defined as the original investment plus profit reinvested, shall be freely transferable abroad after five years from the date of the registration of the original investment, as specified in the "Certificate of Foreign Investment Registered".
2. The Board may reduce the said period, taking into consideration the priorities under the policy guidelines as per Article 7 of this law.

3. The transfer abroad shall be effected in the original currency specified in the "Certificate of Foreign Investment Registered". The funds destined for transfer shall originate from the liquidation of assets or the transfer of capital stock of the enterprise that is the object of the foreign investment, to other juridical or physical persons. The foreign investor is free to transfer abroad the physical assets that were the object of the investment in the event this alternative is opted for.
4. In cases where the amount realized from the liquidation or sale of capital stock exceeds the amount of the original investment plus registered reinvested profit, the foreign investor shall be free to transfer abroad the difference, in accordance with the prevailing tax legislation and foreign exchange regulations.

ARTICLE 14

Alienation of Foreign Investment and Notification Requirements

1. Alienation of foreign investment shall be effected either through the liquidation of assets, or through the transfer of capital stock of the enterprise that is the object of such investment, to juridical or physical persons.
2. In the event of alienation of a foreign investment to a resident Somali juridical or physical person, the transferee shall cease to enjoy the benefits derived from the status of a foreign investor.
3. Any alienation is subject to prior notification to the Board by both the transferor and the transferee. Such notification shall be accompanied by appropriate supporting documentation.
4. The alienation of a foreign investment to other foreign investors shall not require approval, as per Article 9 of this law, but only notification, as per paragraph 3 of this Article.

ARTICLE 15

Investment Incentives

Foreign investment shall be eligible for incentives and facilities, in accordance with the legislation in force governing such incentives and facilities.

ARTICLE 16

Limits to Contracting Debt from Domestic Sources

1. Any enterprise that is the object of a duly registered foreign investment may contract debt from institutional domestic financial sources up to the limit established by the Central Bank of Somalia, in consultation with The Board.
2. The proceeds from such debt contracted from domestic sources shall be used strictly for the carrying out of the activities specified in the "Certificate of Foreign Investment Registered". The Board shall be authorized to verify the due application of the proceeds.

ARTICLE 17

Facilities for Foreign Personnel

1. The Board shall ensure that the immigration authorities facilitate the granting of the entry permits and residence visas to foreign personnel employed by an enterprise registered under this law, and to their families.
2. The Board shall also ensure that said personnel and their families be granted access, for reasons of work, to any part of Somalia.
3. Said personnel may freely transfer abroad up to fifty per cent of their salaries, wages, gratuities and allowances paid in Somalia by the enterprise employing them.
4. Any enterprise registered under this law shall employ qualified Somali nationals whenever they are available. Foreign investment shall seek to make a significant contribution toward the transfer of technology and managerial know-how, and the upgrading of professional skills available in Somalia.

Article 18

Guarantees for Foreign Investment

1. All enterprises that are the object of foreign investment shall receive treatment as favourable as that accorded to domestic enterprises.

2. The property of foreign investment, duly registered under this law, shall not be subject to expropriation measures, except in the case where public interest cannot be satisfied by measures other than expropriation.
3. In the case of such expropriation, prompt compensation shall be paid. Said compensation shall reflect the fair market value of the assets, as a going concern, and shall be freely transferable.

Article 19
Settlement of Disputes

1. Disputes in respect of the implementation of this law shall be settled:
 - a) In a manner to be agreed upon with the investor, or in the absence of such agreement;
 - b) Within the framework of the agreements in force between the Somali Democratic Republic and the investor's home country, or, in the absence of (a) and (b);
 - c) Within the framework of the Convention for the Settlement of Investment Disputes between the State and the Nationals of Other Countries, to which Somalia has adhered by virtue of Law No. 11 of 1967, when such convention applies;
2. In the absence of agreements or convention as per paragraph 1 of this Article, disputes shall be settled through arbitration. An arbitration board shall be established, comprising one member on behalf of each disputing party and a third member acting as a chairman, to be jointly named by the said two members. In the case that the disputing parties fail to agree on the nomination of the chairman within 30 days of the date of the nomination of the second member, the chairman shall be appointed by the President of the Supreme Court of Somalia. The Arbitration Board shall lay down its rules of procedure unrestricted by the rules contained in the civil and commercial code of procedures, save for the rules which relate to the basic guarantees and principles of litigation. The Board shall see to it that the disputes be expediently resolved. Awards shall be rendered by majority vote, and shall be final and binding on

both parties and enforceable as any other final judgement. The Arbitration Board shall decide who shall bear the arbitration costs.

Article 20

Benefits to Existing Foreign Investment

1. Existing foreign investment in Somalia, duly registered under previous laws concerning foreign investment, shall continue to enjoy the rights and obligations conferred to it by said laws.
2. Such foreign investment shall be entitled to benefit, at the foreign investor's option, from the provisions of this new law, provided the registration requirements and other provisions of the previous laws have been complied with, and satisfactory documentary evidence is produced to this effect by the foreign investor. In such case, the foreign investor may apply to The Board for registration under this law within hundred eighty (180) days as of the date of its promulgation.

Article 21

Foreign Investment not Subject to this Law

The provisions of this law shall not apply to foreign investment in mineral research and mining activities, including those related to the petroleum industry and nuclear power. Such investment shall be subject to the Mining Code and the Mining Regulations, and to agreements reached, hereunder, between the Government of Somalia and the interested party.

Article 22

Obligations to Report Transactions Concerning Foreign Investment

Banks, public notaries and entities involved with foreign investment shall notify The Board of the particulars of any important pertinent acts and transactions within thirty (30) days from the date of completion of such acts or transactions. This refers, inter alia, to acts or transactions concerning incorporation, contracting of debt from institutional domestic financial sources, transfer of profit and repatriation of investment.

Article 23

Non - Compliance with the Provisions of this Law

Failure to comply with the provisions of this law, on the part of the foreign investor, shall result in the forfeiture of benefits provided hereunder.

Article 24

*Enjoyment of Benefits under Subsequent
More Favourable Provisions*

No provisions of this law shall preclude the enjoyment by the foreign investor of benefits under more favourable provisions which might be subsequently promulgated.

Article 25

Regulations

The President of the Somali Democratic Republic, at the proposal of The Board, and having heard the Minister of National Planning and the Council of Ministers, may issue regulations for the proper implementation of this law.

Article 26

R e p e a l

Any law incompatible with the provisions of this law is hereby repealed.

Article 27

Entry into Force

This law shall come into force as of the date of its publication in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mohamed Siad Barre
President of the Somali Democratic Republic

**QAYBTA LABAAD
X E E R**

**Xeerka Madaxweynaha JDS Lr. 37 ee 25.8.1987
Kordhinta Saamiyada Dawladda JDS ee Bankiga Adduunka**

- Markuu Arkay:** Qod. 82aad ee Dastuurka;
- Markuu Arkay:** Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddilidda Dastuurka;
- Markuu Arkay:** Go'aannada Golaha Dhexe Guddoomiyeyaasha Bankiga Adduunka (IBRD) lambar 346 iyo 347 ee 4ta Jannaayo 1980, kuna saabsan Saamiga Raasumaalka Bankiga;
- Markuu Tixgeliyey:** In ay lagama maarmaan tahay in la kordhiyo Saamiyada ay ku leedahay Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Raasumaalka Bankiga Adduunka;
- Markuu Tixgeliyey:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;
- Dhegeystayna:** Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxay kordhisay saamiyada ay ku leedahay Raasumaalka Bankiga Adduunka, si waafaqsan farqadaha 4 iyo 5 ee go'aanka Golaha Guddoomiyeyaasha lambar 346 iyo farqadaha 2 iyo 3 ee go'aanka lambar 347 ee isla Golahaas, soona wada baxay 4ta Jannaayo 1980.

Qod. 2aad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, waxaa awood loo siiyey in uu ka qayb galka kordhinta saamiyada Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku wargeliso Guddoonka Bankiga Adduunka, qaadana tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dhaqan-gelinta ka qayb galkan.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla maanta, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 25.8.1987

**Madaxweynaha JDS
(Maxamed Siyaad Barre)**

Xeer Madaxweynaha JDS Lr. 38 ee 27 Agoosto 1987

MAGACAABID NOOTAAYO

- Markuu Arkay:** Qodobka 82aad ee Dastuurka;
- Markuu Arkay:** Sharciga lambar 8 ee 15.2.1961 iyo sharciga lambar 1 ee 2.3.1962, kuna saabsan habaynta hawlaha Nootaayada;
- Markuu Arkay:** Qodobka 2aad, sharciga lambar 7 ee 2.2.1986 oo awood u siinaya Madaxweynaha JDS in uu toos iyo tartan la'aan u magacaabo Nootaayo qofkii mudan;
- Markuu Tixgeliyey:** In Jaalle Dr. Maxamed Cumar Abati uu muddo dheer ka soo shaqaynayey Garsooroka dalka JDS, aqoonna uu u leeyahay shuruucda dalka hawlaha Nootaayannimadana uu si habboon u gudan karo;
- Markuu Tixgeliyey:** Soo jeedinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa Jaalle Dr. Maxamed Cumar Abati loo magacaabay Nootaayo, wuxuuna hawlihiisa ka fulinayaa Xafiiska ka furanayaa Magaaladan Muqdisho.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 27 Agoosto 1987

**Madaxweynaha JDS
(Maxamed Siyaad Barre)**

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Togdheer (Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwada ku saabsan Baafin Jeegga/War. ee lumay.

HADDUU ARKAY: Inuu lumay Jeg/War. ee lam. 0378131 kuna qor-nayd lacag dhan Sh. So. 50,000/- lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, Laanta Burco taariikhdu markay ahayd 8/1/87.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci lam. 2 ee 9/9/1965.

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyoo (ammortamento) Jeegga Wareega ee lambarkiisu kor ku xusan yahay laga sameeyey laanta Burco kuna qoran J/le Cabdi Maxamuud Saalax kuna jirtay lacag dhan Sh. So. 50,000.

WUXUU AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Burco in ay siiso J/le Cabdi maxamuud Saalax lacagta dhan Sh. So. 50,000/- oo ah beddelkii Jeegga Wareega ee lumay ee kor ku xusan, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 20 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ee J.D.S. haddii intaa ka hor aan la keenin wax is hortaag ah.

Burco, 26.8.1987

**Kaal. Maxkamadda
Jaamac C/llaahi Bile**

**Gudd. Maxk. G/Togdheer Burco
Dr. Abuukar Islaw Cumar**

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Banaadir

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Mahad Jabriil Ciise.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg/War. Ir. 0842248, kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J/le Mahad Jabriil Ciise, sida ku cad warqadda Ir. 0905 ee tr. 18/8/87, kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Saddexaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharci lam. 2 ee 9/9/1962kii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Jeeg/War. Lr. 0842248 laga sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, Laanta Saddexaad kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000, kuna qoran magaca J/le Mahad Jabriil Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed, laanta Saddexaad in ay siiso J/le Mahad Jabriil Ciise lacagta cadadkeedu tahay Sh. So. 100.000 oo ah beddelkii Jeeg/War. kor ku xusan, markey ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, had-dii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 18/8/1987.

**Kaal. Maxkamadda
Maymuun M. Maxamed**

**Gudd. Maxk. G/Banaadir
Dr. Cabdi Salaad Shongole**